# JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

WAX-QABADKII XUKUUMADDA SOOMAALIYA
EE
BOQOLKII MAALMOOD EE UGU
HORREEYEY

# RA'IISUL-WASAARAHA

MUDANE CABDI FAARAX SHIRDOON
(SAACID)

<u>HIRAAL</u>

“Soomaaliya oo mid ah, nabad ku wada nool,
Deriskeeda iyo dunidana nabad kula nool
Sharcigu u taliyo
Horumarna hiigsanaysa”

Muqdisho 03/03/2013

- **Guddoomiyaha Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya.**

  **Mudane: Maxamed Sheekh Cismaan Jawaari**
- **Ku-xigeennada Gudoomiyaha Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya.**
- **Xubnaha Sharafta leh ee Baarlamaanka Federaalka**
- **Bahda Saxaafadda iyo marti sharafta kale**

Assalaamu Caleykum Waraxmatullaahi Wabarakaatuhu

..............................[]................................. .............................[]..................................

**Mudane Guddoomiye, Mudanayaal.**

Waxaan Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya uga mahad-celinayaa kaalintii baaxadda lahayd ee uu ka qaatay sidii xukuumaddu u gudan lahayd waajibaadkeeda. Waxaan si gaar ah u xusayaa aqbalaaddii raysal-wasaaraha, ansixintii xukuumadda, oggolaashihii miisaaniyadda, iyo soo saaridda sharciyo kale oo aasaas u ah habsami u socodka hawlaha xukuumadda.

Waxaannu wada ognahay xaaladii adkayd ee dalka ka jirtay xilligii ay xukuumaaddu bilawday hawl-galladeeda.

..............................[]................................. .............................[]..................................

Caqabadihii jirey markii aannu hawsha billownay waxaa ugu waaweynaa burburkii hannaankii dawladnimo, dagaalladii sokeeye ee dabo dheeraaday iyo raadadkii ay ka tageen sida; kalsooni-darrada bulshada dhexdeeda, fikradaha xagjirka, burcad badeednimada, quusta iyo niyad jabka, qaxa iyo barakaca iyo weliba awoodda maaliyadeed ee xukuumadda oo aad u yarayd.

Tusaale fiican waxaa ah in markii ay xukuumaddu shaqada billawday ay khasnadda dawladdu marnayd. Marnaan keliya maahee, xukuumadda waxaa lagu lahaa deyn-hoosaadyo gaaraya ilaa $20 Milyan oo doollar.

Waxaa xusid mudan in ay adkaan lahayd in lagu tallaabsado tallaabooyin horumar leh haddii aanan la helin is fahamkii iyo isku duubnidii xukuumadda dhexdeeda ahayd, iskaashigii iyo wadashaqeyntii hay'daha dawladda iyo madaxda qaranka.

..............................[]................................. .............................[]..................................

**Mudane Guddoomiye, Mudanayaal.**

Ii oggolaada in aan idinla wadaago waxqabadkii xukuumadeyda muddadii 100-ka maalmood ahayd ee ay jirtay, taas oo ku salaysan barnaamijkii siyaasadeed ee xukuumadda ee Baarlamaanku ansixyay, kaas oo ka koobnaa 4 qeybood:

1- Arrimaha Gudaha
2- Arrimaha Debedda
3- Dhaqaalaha, iyo
4- Adeegga Bulshada

## Arrimaha Gudaha

**1.1Sugidda Amniga iyo Xasilinta Dalka:**

**1.1.1** Waxay xukuumaddu dib-u-dhis ku sameysay Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Amniga Qaranka, waxayna dejisay qorshe 4 (afar) sano ah oo ku saabsan arrimaha nabadgelyada, iyo maamulka.

**1.1.2** Xukuumaddu waxa ay heshiis dhinaca tababbarrada ah la gashay waddamo aannu saaxiib nahay, waxaanay tirakoobtay ciidamadeeda ku sugan gobollada dalka ee aanay horay maamulladu uga jirin.

**1.1.3** Waxaa si nabad-gelyo ah loo qaaday dhammaan isbaarooyinkii yaallay gudaha iyo dibadda magaalada Muqdisho, kuwaasoo gaarayay ilaa 60 isbaaro.

**1.1.4** Waxaa dib loo qoray, xaaladda cusub ee dawladnimada Soomaaliyana la waafajiyey Qorshaha Amniga iyo Xasilinta Qaranka (NSSP).

**1.1.5** Waqtigan aan idinla hadlayo, wuxuu dayac-tir ku socdaa rugaha ciidan ee kala ah Kulliyadda Jaalle Siyaad, Xerada Guulwadayaasha, iyo Cisibtaalka Xoogga.

**1.1.6** Xukuumaddu waxay socdaallo shaqo oo u-kuurgal iyo kalsooni dhisid ah ku kala bixiisay inta badan gobollada dalka.

**..............................[]................................. ............................[]..................................**

## La dagaallanka Argaggixisada iyo Xag-Jirnimada

**1.1.7** Xukuumaddu waxa ay diyaarisay 10 (toban) xarumood oo 4 (afar) ka mid ahi ay furan yihiin oo lagu dhaqan celiyo dhallinta ka soo laabatay Al-shabaab, iyo kuwa dagaallada lagu soo qabtay.

**1.1.8** Waxaa ay xukuumaddu abuurtay guddiyo culimaa'u-diin ah oo ka shaqeeya wacyigelinta dhallinta sida khaldan looga dhaadhiciyay diinta.

**1.1.9** Ciidanka Xoogga Dalka (XDS) oo kaashanaya ciidamada AMISOM, waxaa u suuro gashay iney la wareegaan deegaanno badan oo ka tirsan gobollada Baay, Gedo, Shabeellaha Hoose, Shabeelaha Dhexe, iyo Bakool.

**1.1.10** Dedaallada aadka u badan ee ay Laamaha Sirdoonka iyo Nabad-sugidda qaranku sameeyeen awgeed, falalkii argaggixisannimada iyo dilalka qorshaysani xaddigoodii hore aad bay hoos ugu dheceen.

**1.1.11** Waxaannu furray waddada u dhexaysa Muqdisho iyo Baydhaba, tan Beledweyne iyo waddada Kismaayana ishaannu ku haynaa.

## Ka Hortagga Burcad Badeednimada iyo Sababaha Dhiirriggeliya

**1.1.12** Waxay dawladdu qaadatay istiraatiijiyo cusub oo uu berrigu saldhig u yahay, kuna salaysan wacyi-gelin oo lagula dagaallamayo burcad-badeednimada.

**1.1.13** Dawladdu waxay dhiiriggelisay in ay dhallinyarada dableyda ahi ka soo laaban karaan burcad-badeednimada, taas oo keentay in ay dhallinyaro door ahi xirfado kale raadsadaan. Sidaa darteed waxaa shurud la'aan lagu sii daayay lix (6) ajnebi ah oo ay burcad badeeddu horey u qafaasheen, waxaana si weyn hoos ugu dhacay weerarradii marinka xeebaha Soomaaliya loogu gaysan jiray maraakiibta caalamka.

**..............................[]................................. .............................[]..................................**

## Garsoorka iyo Caddaaladda:

**1.1.14** Waxaa la dhameystiray qaab dhismeedka Wasaaradda Garsoorka, waxaana la sameeyey guddi madaxbanaan oo baaritaan ku sameeya xad-gudubyadda ka dhanka ah xuquuqda aadanaha gaar ahaan kuwa loo geysto warfidiyeenka iyo haweenka.

**1.1.15** Waxaa la fuliyay tirakoobka hantida ma-guurtada ah ee dawladda.

**1.1.16** Waxaa la diyaariyay xeerka Golaha Sare ee Garsoorka oo loo gudbiyay Golaha Wasiirada isla markaana la ansixiyey.

**..............................[]................................. .............................[]..................................**

## 2. Arrimaha Dibedda

Xagga arrimaha dibedda xukuumaddu waxay muddadii 100-ka casho ahayd ee ay jirtay ku tallaabsatay guulo faro badan oo ku aaddan soo celintii kalsoonida caalamka iyo cilaaqaadka dawladaha iyo ururrada caalamiga ah.

Waxaa xusid mudan:-

2.1 Xukuumaddu in ay dib u habayn ku samaysay Wasaaradda Arrimaha Dibedda, isla markaana ay qabatay tababbarro kor loogu qaadayo tayada shaqaalaha Wasaaradda, waxaana la dejiyey qorshe dhamaystiran oo ku aaddan safaaradeheenna dibedda, waxaana dabaggal lagu sameeyay hantidii ay dawladdu ku lahayd dalalka dibedda.

2.2 Waxaannu guul la taaban karo ka gaarray in Soomaaliya laga qaado Cuna-qabataynta Hubka si kor loogu qaado tayada Ciidamada Xoogga Dalka Soomaaliyeed iyo ammanka muwaaddiniinta. Arabacada soo socota ayuu Golaha Amaanka ee Qaramada Midoobay ka fariisanayaa arrinta Cuna-qabataynta hubka, waxaana rajeynaynaa in cunaqabataynta hubka laynaga qaadi doono.

2.3 Xukuumaddu waxay ku guuleystay in ay la soo wareegto qorshihii Xasilinta Qaranka Soomaaliya ee ay markii hore IGAD gacanta ku haysay.

2.4 Waxay dawladda Soomaaliya aqoonsi buuxa ka heshay wadamada ay ka mid yihiin Maraykanka, waddamo badan oo ku yaal qaaradda Yurub, iyo Japan.

2.5 Xukuumaddu waxay waddamada deeqda bixiya ku qancisay muhiimadda caalamiga ah ee ay leedahay dib-u-dhiska Soomaaliya, waxaana shirweyne arrintaa ku saabsan London lagu qabanayaa 25, May 2013.

..............................[]...............................................................[]..................................

## Dhaqaalaha

3.1 **Xoojinta Kaabayaasha Dhaqaalaha**

3.1.1 Xukuumaddu waxay diyaarisay miisaaniyaddii dawladda ee uu Baarlamaanka Federaalku ansixiyay. Xukuumadda iyo baarlamaankuba waxay markii ugu horreysay 22 sano ansixiyeen sharcigii maaliyadda qaranka.

3.1.1 Waxaa la bilaabay in dakhliga dekadda iyo gegida dayuuradaha Muqdisho si toos ah loogu shubo Bangiga Dhexe, waxaana dib loo habeeyey qaabkii canshuuraha berriga loo qaadi jirey.

3.1.5 Xukumaddu waxa ay dhamaystirtay oo ansixisay sharciga tariifada, dhawaanna waxaa la horgayn doonaa baarlamaanka.

3.1.6 Xukuumaddu waxay kasbatay in ay waddamada deeqda bixiya ula dhaqmaan in ay Soomaaliya tahay mid ka mid ah Waddamada Nugul **“Fragile States,”** meeshii markii hore Soomaaliya loola dhaqmi jirey sidii Waddan Guuldarraystay **"Failed State."**

3.1.7 Xukuumaddu waxa ay dhamaystirtay qorshayaasha deeqaha iyo horumarinta dalka, waxayna dhaqan galisay in deeqaha iyo fulinta mashaariicda lagu saleeyo mudnaanta dawladda.

3.1.8 Fududayn ay dawladdu samaysay awgeed, waxaa muddo dheer ka dib dekedda Magaalada Muqdisho laga billaabay dhoofinta xoolaha nool.

**..............................[]................................. .............................[]..................................**

3.1.9 Xukuumaddu waxay dib u habeysay maamulka maaliyadda iyo hantida qaranka, waxaanay qaadatay nidaam-xisaabeed loo yaqaan **Special Financial Facility(SFF)** oo kor u qaadi doona hufnaanta maamulidda deeqaha uu dalku helo. Taasi waxay kordhin doontaa kalsoonidda deeq-bixiyeyaasha.

3.1.10 Xukuumaddu waxa ay u hawlgashay sidii uu caalamku u cafin lahaa deymaha caalamiga ee lagu leeyahay dalka Soomaaliya.

3.1.11 Xukuumaddu waxa ay bilawday meelmarinta siyaasadda dawladda ee ku aaddan sharci-dejinta iyo beekhaaminta hirarka ama mowjadaha isgaarsiinta.

..............................[].................................. ..............................[]...................................

## ADEEGGA BULSHADA

Xukuumaddu waxay hawlo baaxad leh ka qabatay hormarinta siyaasaddeedda Arrimaha Adeega Bulshada.

### 4.1 Adeegga Caafimaadka

4.1.1 Xukuumadda waxay sare u qaadday tayada agaasinka caafimaadka, waxayna dhamaystirtay qorshaha caafimaadka dalka ee afarta sanno ee soo socota.

4.1.2 Xukuumadda waxay furtay Dugsi lagu tababbaro xirfadleyda daryeesha haweenka iyo dhallaanka, tirada iyo tayada shaqaalaha caafimaadkana kor ayaa loo qaaday.

4.1.4 Xukuumaddu waxay haatan ku guda-jirtaa in ay salka u dhigto nidaam casri ah oo lagula socdo laguna kormeero tayada cuntada iyo dawooyinka dalka soo gala.

..............................[].................................. ..............................[]...................................

**2 Adeegga Waxbarashada**

4.2.1 Xukuumaddu waxay dhamaystirtay, fulintiisana billowday qorshe dugsiyada loogu dirayo 1 Milyan oo carruur Soomaaliyeed ah, waxaanay u hawl-gashay dejinta qorshe lagu samaynayo manhaj qaran oo midaysan.

4.2.2 Waxaannu dhagax dhignay 10 dugsi oo ay xukuumaddu maamulayso.

4.3 **Gargaarka iyo Dib-u-Dejinta**

4.3.1 Xukuumaddu waxay aasaastay barnaamij daryeel bulsho oo barakacayaasha dib loogu celinaayo deegaanaddii ay ka soo hayaameen.

4.3.2 Xukuumaddu waxay bilowday barnaamij lagu dhiirriggelinayo soo laabashada qurbajoogta xirfadleyda ah, si ay uga qayb-qaataan dib-u-dhiska iyo horumarinta dalka.

**..............................[]................................. .............................[]..................................**

**Mudane Guddoomiye, Mudanayaal**.

**100-kii maalmood ee ina dhaaftay, Golaha Wasiirradu waxay ansixiyeen Sharciyada kala ah:**

1. Sharciga Maaliyadda
2. Sharciga Golaha Garsoorka,
3. Hindise Sharciyeedka Guddiga Kormeerka,
4. Xeerka Guddiga Xuquuqul Insaanka,
5. Hindise Sharciyeedka Maamullada Gobollada iyo Degmooyinka

6. Sharciga Bangiga Horumarinta iyo
7. Sharciga Tariifada

**............................[]................................ ............................[]..................................**

Sidoo kale, waxaa miiska inoo saaran sharciyada kale ee ay ka midka yihiin kuwa:

1. Dib u habaynta Booliska
2. War is gaarsiinta
3. Saxaafadda
4. Hay'adda Sirdoonka iyo Amniga Qaranka
5. Duullimaadka
6. Wasakhda Warshadaha
7. Kalluumaysiga iyo
8. Batroolka

**............................[]................................ ............................[]..................................**

**Mudane Guddoomiye, Mudanayaal**.

Innagoo wax ka soo billownay meesha aad wada og tihiin, oo og baaxadda ay leeyihiin hawlaha inoo harsan, qalbigana ku hayna degdegsiimaha loogu baahan yahay fulidda hawlahaa faraha-badan, ayaa waxa aan aad ugu kalsoonnahay in aannu aad u sii kordhin doonno hawlahayaga iyo wax-qabadkayaga.

Maanta waxaannu joognaa billowgii tubta nabadda iyo horumarka, waadna og tihiin in uu jidku dheer yahay oo aanu sahlanayn, laakiin waxaa looga gudbi karaa wadajir iyo wada shaqeyn. Sidaa darteed, waxaannu u baahan nahay kaalmada Eebbe, kalsoonida shacabka,  iyo wada shaqayntiinna.

Waad Mahadsan tihiin.